LINQ Connect ONLINE PORTAL

CUSUB

Sidee ayaan u bilaabi karaa? Waxay u fududahay sida 1, 2, 3:

1. **Isdiiwaangeli**. Xisaab ka samayso https://linqconnect.com oo dooro Register (Isdiiwaangeli).
2. **Xaqiiji Xisaabtaada**. Xaqiiji xisaabtaada adiga oo gujinaya linkiga xaqiijinta ee iimeelka laguugu soo diray cinwaankaaga iimeelka.
3. **Iminka**. Gal waxa aad ka geli kartaa https://linqconnect.com adiga oo adeegsanaya iimeylkaaga iyo baaswoodhkaaga.

Iminka ayaan is duwaan geliyay oo markii aan isku dayay in aan galo waxa uu leeyahay, “Invalid email or password” (iimeelka ama baaswoodhku waa khaldan yahay)?

Xisaabtaadu ma shaqayn doonto ilaa inta aad xaqiijinayso cinwaankaaga iimeelka iyo baaswoodhkaaga. Ka eeg iimeelkaaga linkiga xaqiijinta.

Sidee ayay noqonaysaa hadii aan iloobo Magaca Lagu Isticmaalo ama Baaswoodhka?

Boga gelitaanka, guji "Forgot your password" (Iloobay baaswoodhkaaga)? Geli cinwaankaaga iimeelka oo guji "Reset Password" (Dib U Samee Baaswoodh). Baaswoodh kumeel gaadh ah ayaa laguugu soo diri doonaa iimeel. Marka aad ku gasho baaswoodhka kumeel gaadhka ah, waxaa laguu sheegi doonaa inaad samaysato baaswoodhkaaga cusub.

Marka aan galayo, ma arkayo xisaabta ardaygayga?

Waa inaad ku dartaa ardaygaaga xisaabtaada LINQ Connect. Guji (+) kadibna ku qor oo buuxi macluumaadka si aad ugu xidho ardaygaaga. Waa inaad u buuxiso nidaamkan arday kasta oo aad doonayso inaad ku darto. Lambarka aqoonsiga ardayga waxa uu u baahan yahay talaabadan. Lambarkan aqoonsiga waxaa laga heleyaa kaadhka warbixinta ardayga, jadwalka ardayga, ama PowerSchool ee hoos yimaada daaqadaada gelitaanka waalidka. Sidoo kale, arday badan ayaa garanaya lambarkooga aqoonsiga oo way ku siin karaan. Hadii aanad awoodin in aad ka hesho aqoonsigan mid kamid ah qaababka sare, fadlan lasoo hadal dugsiga ilmahaaga.

Sidee ayaan ugu dalban karaa cunto bilaash ah/qiimo jaban onleyn ahaan? (waxaa la heli karaa wixii ka danbeeya Julaay 1deeda.)

1. Si aad u dalbato waxa aad tagtaa https://linqconnect.com oo guji "Start Meal Application" (Bilaw Codsiga Cuntada).
2. Gal Hadii aad hore isku duwaan gelisay xisaabta LINQ Connect oo aad gashay, waxa aad gujin kartaa "Start Meal Application" (Bilaw Codsiga Cuntada).

Sidee ayaan u ogaan karaa xaalada codsigayga cuntada bilaashka ah/jaban?

Degmadu waxay ku wargelin doontaa 10 maalmood oo waxbarasho gudahood, iyada oo iimeel ama warqad ah. Hadii aanad helin wargelin, fadlan waxa aad kala xidhiidhaa waaxda adeega cuntada taleefanka 614-797-5993. Waxa aad geli kartaa warqadaada u qalanka marka degmadaadu ay ka shaqayso arjiga oo ku jira jalaska "Notification ka" wargelinta ee qaybta koonaha midig ee dashboard ka.

Miyaan ku arki karaa liiska dugsiga ardaygayga onleyn ahaan?

Haa, shaashada gelitaanka linqconnect.com, geli magaca degmadaada sanduuqa "Check District Menu" (Eegitaanka Liiska Cuntada Degmada). Tani waxay kuu sahlaysaa inaad eegto liiska cuntooyinka ee la bixiyo, macluumaadka nafaqada, iyo macluumaadka xasaasiyadaha.

Miyaan ka xawili karaa lacagtayda mid kamid ah xisaabta ardayda una xawili karaa xisaab kale? HAA!!

Waxa aad u kala xawili kartaa lacagaha xisaabaadka. Waxa aad tagtaa "Transfer Balances card" (kaadhka Baaqiga Xawilaada) ee ku yaala boga "Meal Accounts" (Xisaabta Cuntada). Hadii aad aragto magaca ardaygaaga, waxa aad u xawili kartaa lacagta degmada dhaxdeeda. Lacagta waxaa loogu kala xawili karaa kaliya ardayda ku sugan isku degmo dugsi kaliya.

Miyaan u samayn karaa xadidaad xisaabta ardaygayga? HAA!!

Waxa aad u dejin kartaa xadidaad kharash garaynta ah xisaabta ardaygaaga kaliya hadii degmado dugsigaagu ay soo kordhisay astaanta xadidaada kharash garaynta. Waxa aad tagtaa "Spending Limits card" (kaadhka Xadidaada Kharash Garaynta) ee boga "Meal Accounts" (Xisaabaadka Cuntada) oo hel magaca ilmahaaga. Guji calaamada qalin beensalka ee dhanka midig si aad u samaysato xadidaada kharash garaynta.

Sidee ayaan u arki karaa dhaqdhaqaaqa xisaabta ardaygayga?

Guji "History" (Taariikhda) si aad u aragto taariikhda hore ee xisaabaadka.

Goorma ayay tahay in aan la xidhiidho Waaxda Adeegyada Cuntada ee degmo dugsiga ardaygayga?

• Hadii aad doonayso in laguu soo celiyo lacag
• Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan adeega cuntada ilmahaaga ama dhaqaqaaqa xisaabtooda
• Hadii aad doonayso inaad ka xadido iibsiga ardaygaaga shayada uu xasaasiyada ka qaado ama laga xadiday
• Hadii aad qabto su'aalo la xidhiidha xisaabta cuntada ardaygayga.

Miyaan ka geli karaa xisaabtayda app-ka taleefanka?

Haa, waxaa loo baahan yahay inaad kala soo degto app-ka LINQ Connect ee cusub Apple App Store ama Google Play Store oo ay iminka ku jiraan. QR koodhka aad ku bilaabaysaa waxa ay ku yaalaan hoos.

Apple App Store

Google Play Store